



# Outreach Newsletter

## In this Edition

1. Support The Columbus Zoo.....	2-6
2. Somali Proverbs: .....	7
3. Community Resources:.....	8

## Qormooyinka Caddadkan

1. Taageer Xannaanada Columbus: .....	2-4
2. Tababarka Qoraalka Deeqaha: .....	7
3. Adeegga Bulshada: .....	8

The SomaliCAN Outreach Newsletter is a bilingual publication of the Somali Community. If you have questions or story ideas for making our schools, hospitals or other community resource centers more effective in meeting the needs of special populations including new Americans and people with developmental disabilities, please do not hesitate to contact the SomaliCAN Outreach Newsletter editorial team. We can be reached by phone at 614-439-3034 or e-mail us at [info@SomaliCAN.org](mailto:info@SomaliCAN.org).

## Keep Your Columbus Zoo Great Ka Qaybgal Wanaagga Xannaanada

### KEEP YOUR ZOO GREAT – “Support the Zoo That Supports Our Community”

**Jibril Mohamed**

The Somali population in Columbus began its growth 20 years ago. Today, our community is about 45,000 strong. My organization, the Somali Community Access Network, SomaliCAN, does much within Central Ohio to support our community and embrace the Columbus (and American) culture. This includes advocacy, education and incorporation within the Columbus fabric. So when the Issue 15 campaign approached me for our organization's support, it gave me the opportunity to reflect on how the Columbus Zoo and Aquarium has been there for Columbus' Somali community.

First off, given where our heritage resides geographically, having the opportunity to visit with animals from our home country, including camels, is a special experience – particularly one to share with our children, many of whom were born here in central Ohio.

Many within the Somali community are members and patrons of the Columbus Zoo, and the Zoo also has been a source of employment for Somalis living here in the Columbus area. More than 2,200 full-time jobs are dependent on the Zoo and employers who work with the Zoo, and I feel pride knowing that this includes good jobs for people from within my community. The Zoo is an important economic driver for this region, and it serves as a regular reminder for why we left Somalia for America – for a better life.

Lastly, I would be remiss if I didn't mention the Zoo's focus on education and promotion of lifelong learning through its interactive wildlife exhibits, numerous community education programs, and consistent support of the ceremony held each year for our students graduating from high school.

Eeg bogga 3.

## ... Keep Your Columbus Zoo Great Ka Qaybgal Wanaagga Xannaanada

So I stand strongly behind the Columbus Zoo and Aquarium's effort to renew its 10-year levy. It's not a tax increase. Instead, it renews existing support that protects a part of Central Ohio that is so beneficial and special to us all.

This fall, please join me in voting FOR Issue 15 to keep our Columbus Zoo great.

### ***About SomaliCAN***

*SomaliCAN is a community outreach organization providing information, resources, and consulting services including: cultural sensitivity training, Somali translation, health promotion, youth services, community outreach, policy analysis, advocacy, and referral services.*

*For more information, please visit:*

**<http://KeepYourZooGreat.com>**

**VOTE FOR YOUR ZOO**

## ...Keep Your Columbus Zoo Great Ka Qaybgal Wanaagga Xannaanada

**GACAN KA GEYSO BILICDA XANNAANADA: –**

**“Taageer Xannaanada si ay u Taageerto Bulshaday”**

**Jibril Mohamed**

Taageer Wanaagga Xarunta Xannaanada Xoolaha Taageer Hay'ad Ay Ka Faa'iidaysato Bulshadaadu Dadka Soomaaliyed waxay bilaabeen in ay soo degaan magaalada Columbus muddo 20 sano laga joogo. Maanta, jaaliyaddeennu waa 45,000 oo qof. Hay'adda aan madaxda ka ahay ee SomaliCAN ayaa qayb lixaad leh ka qaadata in bulshada Soomaaliyed ay si wanaagsan uga mid noqoto dadka reer Columbus iyo reer Ohio. Waxyaabaha aynu qabanno waxaa ka mid ah tababarro, ka qaybgalka shaqooyinka iyo raadinta xuquuqda jaaliyadda. Sidaas awgeed, markii ololaha Issue 15 uu ila soo xiriiray si hay'adda SomaliCAN ay taageero u siiso Columbus Zoo, waxaa soo baxday fursad ah in aan bal dib u eego xiriirka ka dhixeeeya Columbus Zoo iyo jaaliyadda Soomaaliyed iyo sida dadka Soomaaliyed uga faa'iidaystaan xaruntan.

Ugu horreyn, dalka Soomaaliya wuxuu hodan ku yahay xoolaha nool; hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliduna wuxuu ku dhisanyahay xoolaha. Sidaas awgeed, in aan helno fursad aan ku booqanno xolo nool sida geela oo ku xaraysan xerada waa mid qaali u ah gaar ahaan carruurteenna oo intooda badan ku dhashay halkan Ohio.

Dad badan oo Soomaaliyed ayaa xubno iyo taageerayaal ka ah , O哥伦bus Zoo iyada oo ay dad badan oo Soomaali ah u shaqo tagaan xarunta Columbus Zoo. Dad ka badan 2,200 oo qof ayaa ka shaqeeya ama u shaqeeya shirkado ku xiran Columbus Zoo waxaan ku faraxsanahay oo aan ogahay in dad badan oo jaaliyadda Soomaaliyed ah ay ka mid yihiin shaqaalahan.

Columbus Zoo waa waddo dhaqaale oo laf dhabar u ah gobolka, waana xusuusin joogto ah oo ku saabsan sababta aan inteenan badan u nimid Maraykanka oo ah in aan nolol wanaagsan samaysanno.

Eeg bogga 5

## ...Keep Your Columbus Zoo Great Ka Qaybgal Wanaagga Xannaanada

Ugu dambayntii, wax weyn baan dhaafay haddii aanan xusin kaalinta Columbus Zoo ay ka qaadato waxbarashada iyo hadafkeeda ah in waxbarashadu socoto nolosha oo dhan iyada oo qabata bandhigyo xayawaanka ah, barnaamijyada waxbarashada bulshada, iyo iyada oo si joogto ah u taageerta xafladda loo qabto ardayda Soomaaliyeed ee sanad walba ka qalinjebiya dugsiyada sare ee gobolka Ohio. Sidaas awgeed, waxaan si aad ah u taageersanahay in Columbus Zoo loo cusboonaysiyo miisaaniyaddeeda 10ka sano ah. Canshuurta la kordhin maayo ee waxaa un la cusboonaysiinaya taageeradii ay heli jirtay xaruntan faa'iidada guud u leh dhammaan dadka ku dhaqan bartamaha Ohio. Bisha Nofeembar, fadlan igala qayb qaado in aan u codayno Issue 15 si Columbus Zoo ay noogu hagaagsanaato.

# VOTE FOR YOUR ZOO

### Wax ka Ogoow SomaliCAN

SomaliCAN waa hay'ad u adeegta iskuna xirta bulshada oo bixisa adeegyo, macluumaaad, iyo talooyin. Adeegyada SomaliCAN waxaa ka mid ah tababarro dhaqanka ah, turjumaad Soomaaliga, daryeelka caafimaadka, adeegyada dhallinyarada, xiriirka bulshada, falanqaynta siyaasadda gobolka, u ololaynta xuquuqda Soomaalida iyo wargelinta shacabka.

Wixii macluumaaad ah ka eeg [www.SomaliCAN.org](http://www.SomaliCAN.org).

## Maahmaahyo Soomaaliyeed

### Somali Cultural Corner

Wargeyska SomaliCAN Outreach wuxuu u adeegaa jaaliyadda Soomaaliyeed ee Ohio. Haddaba, tiirarka ugu waaweyn ee uu ku qotomo wargeysku waxaa ka mid ah kobcinta iyo sare u qaadidda afka Soomaaliya iyo horumarinta adeegsiga afkan hodanka ah. Sanadihii tagay wuxuu wargeysku ku guulaystay in uu qayb lixaad leh ka qaato sidii afka Soomaaliga loogu dari lahaa luqadaha lagu turmimi karo Google Translate. Iskaashi dhex maray shirkadda Google iyo hay'adda SomaliCAN ayaa keenay in Google ay isticmaasho in ka badan 50 caddad oo wargeyskan ah maaddaama uu wargeysku ka mid yahay ilaha kooban ee laga heli karo af Soomaali hufan oo si wacan loogu turjumay af Ingiriis. Sidaas awgeed, si aynu u sii wadno kobcinta iyo horumarinta af Soomaaliga, wuxuu wargeysku soo daabici doonaa sheeko xariirooyin, maahmaahyo, gabayo, heeso, iyo noocyada kala duwan ee suugaanta Soomaaliyeed. Bishan Oktoobar, waxaynu ku billaabynaa tiro maahmaahyaha ay Soomaalidu caanka ku tahay ka mid ah:

1. Aqoon la'aani waa iftiin la'aan
2. Baadi nimaan lahayn bay ag joogtaa
3. Culimo dad u eki bay kugu dishaa, abeesana dhul u eki
4. Dal aqoon la'aan waa la habaabaa, dad aqoon la'aanna waa la qadaa
5. Far kaliya fool ma dhaqdo
6. Gari laba nin kama wada qosliso
7. Hal libaax arkaysaa ma godlato
8. Ishiisa laga arkaa ushiisa lagu tumaa
9. Meel hoo u baahan hadal wax kama taro
10. Nin daad qaaday xumbo cuskay
11. Ood kaa dheeri kuma dhaxan tirto
12. Qowl nin weyn ka dhacay waa qolof geed ka dhacday
13. Run iyo ilkaba waa la caddeeyaa
14. Soomaalidu been way sheegtaa beense ma maahmaahdo
15. Talo adigaa ku nool ee iyadu kuguma noola
16. Walaalo is neceb way xoolo yareeyaan wayna xabaalo badiyaan
17. Xaglo laaban xoolo kuma yimaadaan

## Grant Writing Workshop

**United Way of Central Ohio**

**Neighborhood Training Academy**

**Targeting for Grant Writing Success**

Dates & Times: Wednesday, October 21, 2015 / 9:00 a.m. - 1:00 pm

Class Description: This workshop will provide participants the opportunity to learn key components and understanding of grant proposals. Workshop will address developing clear goals and objectives, budgets and writing concise narratives.

Cost: \$15.00

Location:

United Way of Central Ohio

360 S. 3rd St., Columbus, OH 43205

To register, please visit: <http://liveunitedcentralohio.org/agencies-initiatives/initiatives/neighborhood-partnership-center/neighborhood-training-academy/neighborhood-training-academy-schedule>

#####

If you have questions or story ideas for making our schools, hospitals or other community resource centers more effective in meeting the needs of special populations including new Americans and people with developmental disabilities, please do not hesitate to contact the SomaliCAN Outreach Newsletter editorial team. We can be reached by phone at 614-439-3034 or e-mail us at [somalican@gmail.com](mailto:somalican@gmail.com).

## Central Ohio Community Resources

**Police:**

Emergency: 9-1-1

Non-emergency: 614-645-4545

Sheriff: 614-462-3333

**Mental Health Crisis:**

Netcare Access: 614-276-2273

**Poison Control:** 1-800-222-1222

Columbus Health Department

Free Clinic: 614-240-7430

**Legal Matters:**

Legal Aid Society: 614-241-2001

**Child Abuse and Neglect:**

FCCS: 614-229-7000

**Housing:**

CMHA: 614-421-6000

**Information and Referral:**

HandsOn: 614-221-2555 or 211

**Somali Services****SomaliCAN**

614-489-9226

[www.Somalican.org](http://www.Somalican.org)The Omolesky Law Firm  
614-441-5305**SOMALICAN SERVICES:****Health Communication and Literacy:**

- Patient education
- Prescription access
- Cultural competency training
- Information & Referral

**Community Education:**

- Youth engagement
- Services in Schools
- Advocacy and Support
- Scholarships
- Annual Graduation
- Crime Prevention
- Disaster Preparedness

**SomaliCAN Outreach Newsletter:**

- Monthly bilingual newsletter
- Advertisements
- Articles
- Cultural Competency
- Research
- Legislation
- Developmental Disabilities

**Immigration Services:**

- Green card applications
- Citizenship applications
- Citizenship education

**Somali Interpretation & Translation:**

Do you require highly qualified legal interpreters and translators in an Ohio court, law office, federal agency or other venues? SomaliCAN is the most reliable source of highly competent professional Somali court/legal interpreters and translators in Ohio and around the United States and globally.

Please contact a SomaliCAN specialist today. SomaliCAN provides interpretation and translation in social services, medical, legal, academic and financial settings.

**SomaliCAN**

Phone. (614)489-9226

Fax: (614) 448-4395

E-mail:

[info@somalican.org](mailto:info@somalican.org)

To advertise a product or service, contact us today:  
[info@somalican.org](mailto:info@somalican.org).



Funded by the Ohio Developmental Disabilities Council under the Developmental Disabilities Assistance and Bill of Rights Act, Public Law 106-402.

To request a copy of SomaliCAN Outreach Newsletter send an e-mail to  
[Outreach@SomaliCAN.org](mailto:Outreach@SomaliCAN.org) or visit [www.Somalican.org](http://www.Somalican.org).